

Taageerida ardayda oo Joogta Guriga: Fasalka 1

Waxaa markii hore sameeyay Dugsiyada Dadwaynaha ee Degmada Howard (Howard County Public Schools); waxaa loo diyaarshay Dugsiyada Dadwaynaha ee Denver (Denver Public Schools)

Dulmarka

Tasmadaan waxaa loo sameeyay inay bixiso fikrado lagula fal galaayo carruurta ku jiray hawlaha waxbarashada inta dugsiyadu xiran yihiin cudurka COVID-19 awgiis. Hawlaha waxaa loogu talagalay inay gacan ka gaystaan ilaalinta firfircoonaanta garaadka carruurta intay guriga joogaan. Fikradaha shaqadu badal uma noqonayaan casharka heerka koobaad ah ee dugsiyada lagu baxsho. Talaabooyinka ugu fiican ee casharada koobaad waxaa la samaynayaa marka ardaydu kusoo laabtaan dugsiga.

Hawlaha iyo shaqooyinka carruurta guriga ku samaynayaan waxaa loo adeegsan doonaa qiimayn ahaan ama waxaa lagu darayaa qayb kamid ah fasalka ardayda. Qoysasku waa inay akhriyaan liiska dookhyada la xushay ee ku haboon ilmahooda ayna heli karaan. Nashaadaadka waxaa la samayn karaa wax ka badan hal mar.

Dagso Jadwalka Hawlaha Maalin kasta

8:00 AM-9:00	Kac oo Diyaar Noqo	Cun quraac, labiso, una diyaar garoow maalinta
9:00 AM-10:30	Wagtiga Waxbarashada	Ka dooro hal ama ka badan dookhyada ku jira liiska hoose.
10:30 AM-11:30	Wagtiga Shaashada	Ka dooro hal ama ka badan oo nashaadaadka shaashada ah oo ku jira liiska hoose.
11:30 AM-12:30	Qadada iyo Wagtiga Fasaxa	Cun qado, soo wareeg ama banaanka kusoo ciyaar
12:30 PM-1:30	Aqrinta	Akhri buug ama ka dooro buug aalada oonleenka ah oo ku jira mid kamid ah ilaha hoos ku qoran.
1:30 AM-3:00	Wagtiga Waxbarashada	Ka dooro hal ama ka badan dookhyada ku jira liiska hoose.
3:00 AM-4:00	Doorashada Xorta ah	Dooro shaqo sida legos, wax sawirada, cunto karinta, googaalaysiga, ciyaaraha boorka

Dookhyada Hawsha Tacliinta

Qayb kasta oo casharka kamid ah waxay leedahay dookhyada "Boorka Dookha". Ka fikir inaad hawlo kaladuwan ka doorato mawduucyo dhaw ah oo kaladuwan maalin kasta. Dookhyadaan waxaa ku jira fursadaha jimicsiga jirka, akhrinta buugta, iyo adeegsiga tignooloojiyada, ilaha oonleenka ah, iyo barnaamijyada taleefishinka. Wada sheekaysiga aad la samayso cunugaaga ee ku saabsan shaqooyinka ay samaynayaan ayaa gacan ka gaysan doona taageerida xirfadaha hadalka iyo fahanka.

Fadlan adeegso shaxda soo socota (oo ay markii hore lahaayeen Dugsiyada Dadwaynaha ee Degmada Howard (Howard County Public Schools) ayna dabaqeen adeegsigooda Dugsiyada Danwaynaha ee Denver (Denver Public Schools) si aad uga caawiso cunugaaga doorashada shaqooyin kaladuwan maalin kasta si aad u dhiiri galiso sii wadista casharka ee dhammaan mawduucyada:

Mawduuca	Dookha 1	Dookha 2	Dookha 3	Dookha 4
Farshaxan Luqadaha	<p>Akhri/dhagayso sheeko kadibna adeegso jeestada sabuurada, qalimaanta koobiga, qalimaanta midabka, ama riinji si aad u abuurto sawir la xariira sheekada.</p> <p>U adeegso aalada moobilka si aad u gasho websetka oo si cod dheer ah ku akhrinaaya sheekada. www.storylineonline.net</p>	<p>Adoo adeegsanaaya fartaada qoraalka ugu qurxoon, waraaq u dir saaxiibkaa ama macalinka.</p> <p>Gacaliye _____,</p> <p>Hi! _____</p> <p>Saaxiibkaa,</p>	<p>Raadso buug aan mala awaal ahayn oo ku xiiso galiya. Kadib markaad akhrido, qor oo muuji 5 xaqiiqooyin oo aad ka baratay akhrinka buuga.</p>	<p>Ciyaar ciyaarta “Xirmooyinka Sawirka la gasho (Tic-Tac-Toe Blends)” - Sawir shaxda tic-tac-toe. Halkii aad ka dooran lahayd x ama o, ciyaar yahan kasta wuxuu dooranayaa xarfo lamaane ah. Ciyaar yahan kasta wuxuu qaadanaaya tookadiisa asagoo qoraaya xarafka isaa lamaan kuna qoraaya meel ka banaan sabuurada. Laakiin ka hor intuu qorin, ciyaaruhu waa inuu ku dhawaaqaa eray ku biloowda isla xarafkaas lamaan. Ex: bl, cl, br, tr, fl, gl, pl, scr, sk, spr</p>
Xisaabta	<p>Baro sida wax loogu tiriyo horay iyo gadaal adoo ku bilaabaaya tiro kasta (inta u dhaxaysa 120) adoo samaynaaya shaqooyin kaladuwan - ku boodaaya hal lug, ku boodboodaaya xarig, layn sugitaan oo dukaan loogu jiro taagan, iwm.</p>	<p>Qaado sheey yaala gurigaaga sida buug ama qalin qori. Raadi waxyaabaha ka dheer iyo waxyaabaha ka gaaban sheeyga aad dooratay. Samee liiska sheey-yadaas.</p>	<p>U adeegso kaararka aad ku dheesho si aad u samayso laba tiro. Iskudar tirooyinkaas. Muuji sida aad iskugu dartay.</p>	<p>Qor jumlad kudar ah ama kajar ah. Kadibna qor u'aal erayo ah oo jumlada waafaqsan.</p>



Saayniska	Hayso joornaalka sayniska guriga! Wax cusub ku dar maalin kasta adoo qoraaya ama sawiraaya. Maxaad la yaabtaa? Maxaad aragtaa (ujeedaa, maqlaysaa, dareemaysaa)? Akhri buugaagta sayniska ee dhabta ah kadibna qor waxa cusub ee aad baratay.	Guriga ma kuu joogaa xayawaan rabaayad ah ama xayawaan boonbale ah ood jeceshahay? Adoo adeegsanaaya xogta ugu badan ee aad heli karto, sawir oo calaamadee sawir ku saabsan qaybaha jirka ee xayawaanka iyo shaqada ay qayb kasta oo jirkaas kamid ahi ay qabto. Ma ujeedaa wax xayawaano ah oo banaanka jooga? Qor waxa aad u jeedo ayagoo samaynaaya. Waa maxay habdhaqanka aad u jeedo?	Raadi walxo/kubado kaladuwan oo goobin ah oo yaala gurigaaga. Maxay kula tahay inay dhici lahaayeen haddii aad tartiib u riixdo kubada? Haddii aad si adag u riixdo kubada? Maxaa dhacay? Maxaa sababay? Waa maxay boonbalayaasha kale ee aad u riixi karto qaabab kala duwan? Ku qor waxa sababay iyo saamayntooda joornaalkaaga sayniska guriga.	Si dhaw ugu fiirso waxyaabaha kaladuwan ee aad ku aragto gurigiina ama banaanka (<i>asagoo qof wayn uu kuu fasaxaayo</i>). Meeqa eray oo kaladuwan ayaad adeegsan kartaa si aad u qeexo sheeyga? Ma qeexi kartaa midabka, taabashada, xajmiga, qaabka? Ma jiraan sifooyin kale oo sheeygu leeyahay? Kuqor xogta ku aadan sheeyga joornaalkaaga sayniska guriga.
Cilmiga Bulshada	Abuur liiska xeerarka. Xeerarka waxaa lahaan kara qoyskaaga, dugsiga, ama bulshada. Sawir naftaada oo raacaayaa xeer kasta.	Abuur qariirada meesha aad jeceshahay (tusaale, garoonka ciyaarta, guriga, xaafada).	Fiiri sawirada hore iyo kuwa hadda. Ka hadal waxay ka siman yihiin iyo waxay ku kala duwan yihiin.	Kusoo wareeg gurigiina oo aqoonso alaabaha la sameeyay iyo meesha ay ka yimaadeen.
Farshaxana da Ku quseeya	<i>Faxshaxanka:</i> Sawir xubin qoyskaaga kamid ah oo ay ku hareeraysan yihiin waxyaabo muhiim u ah qofka.	<i>Waxabrashada Jirka iyo Caafimaadka:</i> Samee 30 daqiiqo jimicsiga jirka ood dooranayso adiggu AMA Samayso xaflad qoob ka ciyaar ah! Ku dheel heesta aad jeceshahay.	<i>Tignooloojiyada Casharada:</i> Baro sida loo qoro magacaaga koobaad iyo kan awoogaa, magaca/baasweerka aad aalada ku gasho, iyo/ama erayada xawaaraha dheer ood galinayso dukumiintiga lagu qoro erayada ee faaruqa ah.	<i>Muusikada:</i> Dhagayso hees uun kadibna aqoonso baydka kadibna xifdi. U turjun mirahaas qoraal ahaan. tusaale. ABAB.

Ilaha Dhijitaalka ah

Halkaan waxaad ka helaysaa dhawr ilood oo lasoo jeediyay oo oonleen ahaan lagu gali karo

- [Barnaamijka Wax ku baro guriga ee \(Scholastic Learn at Home\)](#)
- [PBSKids](#)
- [Maktabada Oonleenta ah ee Denver Public Schools](#)
- [Adeegga Sheekada Taleefanka ee Maktabada Dadwaynaha ee Denver](#) (waxaad ku helaysaa afafka Ingiriiska, Isbaanishka, Amxaariga iyo Vietnamese)
- [Dookhyada Tignooloojiyada Cilmiga ee DPS:](#)
 - Dooro Qaybaha Dugsiga → Dugsigaaga → Gal (School Breakdowns → Your School → Go)!
 - Batoonka [“Ogolaanshaha Waalidka ayaa Qasab ah \(Parent Consent Required\)”](#): Ilaha lagu ogolaaday ogolaanshaha waalidka ee dugsigaaga
 - Batoonka [“Ogolaanshaha Waalidka Qasab Maaha \(Parent Consent Not Required\)”](#): Ilaha ay ogolaatay degmadu

[Fikradaha nashaadaadka waalidka oo ku qoran afka Isbaanishka](#)

- [Las Provincias](#)
- [Bebesymas](#)
- [Sapos Y Princesas](#)

[TV ga Waxbarashada](#)

PBS waxay leedahay noocyo kaladuwan oo TV yada waxbarashada ah. Halkaan ayaad ka helaysaa qabaka aad ku gali karto BPS ka aaga Denver.

- [Dhanka Khadka Hawada \(Antenna\)](#)
 - Rocky Mountain PBS: Channel **6.1**
 - RMPBS KIDS: Channel **6.2**
- [Cable TV \(Comcast\)](#)
 - Rocky Mountain PBS: Channel **6 iyo 658**
 - RMPBS KIDS: Channel **245**
 - Create/World*: Channel **248**
 - Markaad Dalbato: Channel **1** ("Colorado-haaga")
- [Satalaytka \(TV GA TOOSKA AH\)](#)
 - Rocky Mountain PBS: Channel **6**
- [Satalaytka \(Khadka Diishka\)](#)
 - Rocky Mountain PBS HD: Channel **6**